Magaca iyo lnb.cpr. (cpr. nr.) (label)

| |
|---|
| |

# Ogalaanshaha in la isticmaali karo warbixinta caafimaadka iyo kaydinta waxyaabaha bayoolajiga ah ee cusbataalka Rigshospitalet ka qaado dadka buka.

Waxaan jecelahay inaan kaydino baadhitaanada iyo saamiyada lagaaga qaad cusbitaalka, oo aanu ku kadino baanka baayoolajiga(biobank). Kaydka ayaa mustaqbalka loo isticmaalayaa baadhitaanada shaybaadhka ee nooca cudurkaaga, si loo iftiimiyo xidhiidhka cudurada hiddo ahaan loo dhaxlo, caabuqyada, deegaanka, qaab nololeedka, cuduradda kale iyo cudurka aad qabto. Ujeedadu waa in la horumariyo dawaynta bukaanka qaba cudurkaaga oo kale.

Dhammaan mashruucyada cilmibaadhista baanka bayoolajiga, waa inay ansixiyaan guddida cilmibaadhista iyo saynsika, loona gudbiyo Hayadda Agaasinka Xogta.

Warbixinta ku saabsan cudurkaaga, sida ku xusan qaybta hore ee qoraalka, waxaa loo isticmaali doonaa, iyadoon aan la muujinaynin aqoonsigaaga (hab qaarsoodi ah).

---

Waxaan rabaa in la kaydiyo dhiigga iyo waxyaabaha kale ee baayoolijiga ah ee la iga qaado, oo dabadeed loo isticmaalo cilmi ahaan astaamaha iyo nooca cudurka aan qabo.

Haa ☐ Maya ☐

Haddaan ka noqoyo oggolaanshaha, waan la socdaa, inaan u tegayo shaqaalaha cusbataalka Rigshospitalet, oo aan ka qaadanayo buugga yar ee ”Nudahaaga, doorashadaada/**Dit væv, dit valg**”, kaasoo ay sameeyeen wasaaradda arrimaha gudaha iyo wasaaradda caafimaadka, tilmaamana ka bixinaya sidaan uga noqon lahaa arrintan, iyadoo aanay saamayn ku yeelan dawaynta hadda ii socota iyo ta mustaqbalkaba.

Taariikh: ______________________ Saxeex: ______________________________

Ogolaanshaha waxa bixiyay:______________________________________________

**Cadaynta la buuxiyay waxa loo dhiibayaa shaqaalaha cusbitaalka Rigshospitalet marka lagu dhigayo**

**24. november 2015**

**Baadhitaan faa'iido u leh bukaanka mustaqbalka**

Waxaanu ku waydiisanaynaa, inad noo ogolaato kaydinta saamiyada lagaa qaaday, oo aanu ku kaydino baanka baayoolijiga ee PERSIMUN, si ay suurta gal noogu noqoto mustaqbalka inaan baadhno difaaca jidhka ee infakshanada ama caabuqa.

Waxaanu ka samaynay cusbitaalka Rigshospitale baanka baayoolijiga(biobank), halkaasoo lagu kaydiyo saamiga laga qaado bukaanka. Saamiga laga qaado bukaanka ee lagu kaydiyo baanka bayoolijigana waxay ka kooban yihiin dhiigaga, candhuuufta, saxarada, waxyaabhan oo mustaqbalka loo isticmaalo mashaariicda cilmi baadhista, ujeeddada cilmi baadhistan oo ah in la fahmo cudurada bukaanka haya iyo dhibta ay ku hayaan, khatarta caabuqa ay ku keeni karaan bukaanka ama mar horaba ku keenaeen
Waxyaabahan baayoolijiga ah ee laga qaaday bukaanka ayaa waxaa lagu baadhayaa shaybaadh, iyagoo xooga saaraya ilmaha(jiinkiisa, borotiinkiisa iyo hormoonadaba), sidoo kale waxay aad u baarayaan noolayaasha yaryar ee aanu isha arki karin sida(bakeeriyada iyo fayriska) kuwaasoo ku jira waxyaabahan baayoolijiga ah. Macluumaadka laga helo baadhitaanka waxaa lagu ogaanayaa wax badan oo la xidhiidha difaaaca jirka iyo infaksanada ama caabuqyada jira.

Macluumaadkan cusub ee shaybaadhka lagu helo, ayaa waxaa lala kaashanayaa warbixinta caafimaad ee ku diiwaan gashan joornaalkaaga caafimaadka, si natiijada baaditaanka loogu tarjumo sida oogu fiican. Siddaa daraadeed saamiyada aad oogu ku deeqayso baanka baayoolijiga ee PERSIMUNE, wuxuu ahmiyad wayn ugu fadhiyaa mashaaariicda cilmi baadhista, inay soo saaaraan oo hormariyaan habab cusub oo lagu dawayn doono bukaanada mustaqbalka. Shaybaadhida iyo falaqaynta natiijada baadhitaanada waxay ka dhacdaa cusbitaalka Rigshospitalet ama xarumaha dalalka EU-da ee aannu wadashaqaynta leenahay.

Dhiigaga uu qaado baanka baayoolijiga(biobank) waxaa lal qaadaa dhiigaga kale ee lagaa qaado marka lagu baarayo, oo lama isticmaalo wax kale. Dhiiga waxaa lagu qaadaa saddex silinge ama dhalooyinka dhiiga lagu qaado (2 x 9 ml og 1 x 3 ml), dhiigan yar ee lagaa qaadayo wax dhib ah ah kuma laha caafimaadka jirkaaga.

Baadhitaanka dhiiga – candhuufta- iyo saxarada - waxaa la qaadaa marka ogalaanshaha la bixiyo, mar labaad waxaa la qaadaa 3-6 bilood ka dib iyo haddana sannad ka dib, inta ay daawayntu kaaga socoto cusbitaalka Rigshospitalet. Qorshaha qaadida dhiiga way isbadeli kartaa, haddii ay daawo kuu socoto, ama ay wax yeelayso difaaca jidhkaaga ama haddii ay jiraan astaamo sheegayo in difaaca jirkaaaga ee infakshanada ama caabuqa uu aad u hooseeyo.

Baadhitaaanada shaybaadhka iyo diwaan galnta natiijada baadhitaanka, waxaa lagu sameeyaaa cusbitaalka Rigshospitalet ama xarumaha kale ee aan wada shaqayno ee wadamada EU-da.

Macluumaadkaaga shaqsiga ah si buuxda ayaa loo xafidayaa waana la qarinayaa. Ka hor inta aan saamiyada baanka loo gudbin mashruucyada cilmibaadhista, waa inay soo ansixiyan Golaha Cilmibaadhista iyo Hayadda Agaasinka caafimaadka.

Adiga ayaa ikhtiyaar u leh, inaad ogalaaato ka qaybqaadashada ilmahaaga, go'aankaaguna wax saamayn ah kuma yeelanayo daawayntaada mustaqbalka. Haddaad ogolaato in ilmahaagu ka qayb qaato, oo aad ka dib is bedesho waxaa lagaa codsanayaa inaad ka diiwaan galiso rabitaankaada halka lagu diiwaan galiyo isticmaalka unugyada. Waxaa lagaa codsanayaa inaad ka diiwaan galiso rabitaankaada halka lagu diiwaan galiyo isticmaalka unugyada. Waxa aad buxuinaysaa foomka "Unugyada, doorashadaada/**Dit væv, dit valg**", markaas ayaad u diraysaa Diiwaanka Isticmaalka unugyada (Vævsanvendelsesregisteret) oo hoos yimaadda Hayadda Agaasinka Caafimaadka (Sundhedsstyrelsen). Haddaad u baahato caawimo la xidhiidh shaqaalaha kilinigga ama xarunta.

*Mahadsanid,* waqtiga aad ku akhriday macluumaadka la xidhiidha baanka bayoolajiga.

Waxaanu kaa codsanaynaa, inaad noo ogolaato, inaanu saamiga lagaa qaado ku kaydino baanka bayoolajiga, PERSIMUNE, adigoo buuxinaya oo saxeexaya foomka **Ogalaanshaha in la isticmaali karo warbixinta caafimaadka iyo kaydinta waxyaabaha bayoolajiga ah ee cusbataalka Rigshospitalet ka qaado dadka buka**

Salaan Wacan,

Shaqaalaha PERSIMUNE